SOOMAALI

# TABABARKA BUUXA EE AQOONTA NOLOSHA SHAQADA DHIJITAALKA AH EE DHALLINYARADA



## HAGAHA LOOGU TALAGGALAY QOFKA DHALLINYARADA AH EE CODSANAAYA GOOB SHAQO.

Wuxuu ku habboon yahay ka caawinta isticmaalka Duunikoutsi ee qaybta luqadda soomaaliga.

nyt
TURKU
Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto
Vipuvoimaa EU:lta 2014–2020

# TUSMADA QORAALKA

## MACLUUMAAD KU SAABSAN TABABARKA BUUXA

Tababarka buuxa ee aqoonta nolosha shaqada dhijitaalka ah ee dhallinyarada....3
Waa maxay ablikeeshinka Duunikoutsi?....4
Luqadaha Duunikoutsi....5
Sidaan soo socota ayaad u isticmaalaysaa Duunikoutsi....6

## TABABARKA BUUXA

**Is aqoonsiga ku saabsan  aqoonta nolosha shaqada ee mustaqbalka....7**
Garashada awoodaha & qiimaha....8
Aqoonsashada aqoontaada....9
**U jiheysashada dhanka nolosha shaqada....10**
Raadi goobaha shaqada & shabakadaha xiriir wadaagga....11
CV-ga & codsiga shaqada....12
**Sidan ayaad CV ugu samaysan kartaa mishiinka CV-ga ee Duunikoutsi....13**
Waraysiga shaqada....14
Shaqaynaya....15
Si fiican ayaad wax u samaysay!....16

Hirgelinta hagahan waxaa uu qayb ka yahay mashruuca Nuorten digitaalinen työelämätaitojen valmennuskokonaisuus.

Hirgelinta hagahan waxaa mas’uul ka ah Nuorten yrittäjyys ja talous NYT

Macluumaad dheeraad ah:

nuortennyt.fi/palvelu/duunikoutsi/
nuortennyt.fi/nuorten-digitaalinen-tyoelamataitojen-valmennuskokonaisuus/

# TABABARKA BUUXA EE AQOONTA NOLOSHA SHAQADA DHIJITAALKA AH EE DHALLINYARADA

Nuorten yrittäjyys ja talous NYT iyo magaalada Turku ayaa lagu sameeyay tababarka aqoonta nolosha shaqada dhijitaalka ah oo dhammaystiran, kaasoo ay dhallinyarada, dadka ka shaqeeya hagitaanka iyo shaqaalaha waxbarashadu ay ka helayaan macluumaadka wakhtiga la socda ee nolosha shaqada, aqoonta looga baahan yahay nolosha shaqada iyo agabka taageeraya aqoonta nolosha shaqada.

Hadafka mashruucu waa in dhallinyarada qaab dhijitaal ahaan ah loo siiyo tababarka aqoonta nolosha shaqada ee hore ahaan loo sii qaadanaayo, islamarkaana ka hortaggaaya takoormista, iyadoo la kaashanaayo ablikeeshinka NYT-Duunikoutsi iyo tababarka dhammayska tiran ee uu hagahan ka kooban yahay.



Mashruucan waxaa loogu talaggalay ardayda heerka waxbarashada labaad iyo saddexaad ee Turku iyo Varsinais-suomi, dhallinyarada shaqo la'aanta ah iyo kuwa suuqa shaqada bannaanka ka ah, iyo weliba dhallinyarada asalkooodu ajnabiga yahay ee qaba baahiyaha gaarka ah.

Mashruuca waxaa lagu maalgeliyay waxqabadyadii ka dhashay safmarkii covid-19 ee midowga. Maalgelinta Keski-Suomen ELY-keskus ee ka timid Sanduuqa dhaqaalaha ee arrimaha bulshada ee Yurub (ESR), lacagta cayiman ”Alueiden kestävän kehityksen ja elinvoiman tukeminen” ee uu bixiyo Varsinais-Suomen liitto iyo mashruuca shaqaynaayay 2021-2023 ee magaalada Turku.

nyt TURKU Euroopan unioni Euroopan sosiaalirahasto Vipuvoimaa EU:lta 2014–2020

# Duunikoutsi

Tababarka dhijitaalka ah waxaa laga helaa ablikeeshinka lacag la'aanta ah ee Duuni-koutsi ee Nuorten yrittäjyys ja talous NYT. Samaynta leyliska Duunikoutsi waxaad ku heleysaa dhammaan aqoonta aad u baahan tahay ee ku saabsan nolosha shaqada iyo codsiga shaqada. Tababarka ku jira ablikeeshinka waxaad ku dhammaystiri kartaa hagahaan.



## Duunikoutsi waa tababaraha nolosha shaqada oo kaa hagaaya kaana caawinaya:

- Codsashada shaqooyinka ugu horreeya
- Kordhinta aqoonta nolosha shaqada
- Samaynta codsiga shaqada iyo CV-ga
- U  diyaargaroobista waraysiga shaqada
- Is aqoonsashada iyo aqoonsiga waxyaabaha aad ku fiican tahay
- Helitaanka macluumaadka cusub ee ku saabsan nolosha shaqada
- Helitaanka waddadaada kuu gaarka ah ee aad u marayso arrimahaaga

Leylsiyada iyo talooyinka la xirira codsashada shaqada


Mishiinka CV-ga ee ablikeeshanka Duunikoutsi, kaasoo adiga kuu qaabaynaya CV diyaar ah oo la buuxiyay

Borofaylka aqooontu wuxuu kaa caawinayaa aqoonsashada iyo sheegidda aqoontaada

Chatbot-ka wuxuu samaynayaa talooyin, wuxuuna macluumaad dheeraad ah kaa siinayaa mowduucyada la xiriira nolosha shaqada

Farriimo dhiirrigelin ah iyo fiidiyowyada nolosha shaqada

Waxaad Duunikoutsi ku isticmaali kartaa borowsarka internetka ee cinwaankiisu yahay [www.duunikoutsi.fi](http://www.duunikoutsi.fi)



# LUQADAHA DUUNIKOUTSI

Aqoonta dhinacyada badan ee nolosha shaqada waxaa xaq u leh qof kasta oo dhallinyaro ah. Si dhallinyaro badan ay u helaan macluumaadka iyo aqoonta ay uga baahan yihiin codsashada shaqada, waxaa Duunikoutsi lagu helayaa luqado badan.

Duunikoutsi waxaa lagu helayaa luqadaha soo socda: af finnish, af iswiidhish, af ingiriis, af finnish fudud, af soomaali, af carabi iyo af ruush.

## ERAYADA FURAHA AH EE LUQADDAADA KU QORAN

Qaybta luqada soomaaliga, waxaa lagu hirgeliyay habka la mideeyay ee afka finnishka fudud iyo af soomaaliga, kaas oo taageeraya barashadaada afka finnishka.


Erayada muhiimka ah ee nolosha shaqada la xiriira waxaa lagu turjumay soomaali, iyadoo ay waxyaabaha kale ku qoran yihiin af finnish fudud.

Marka aad ablikeeshinka furto, liiska billowga ah ka dooro luqaddaada.

Badhanka 'Translation' ee ka muuqda geeska sare ee leylisyada ayaad ku heli kartaa erayada la turjumay. Waxaad gujin kartaa erayada leh midabka cagaaran si aad tarjumaadda u aragto.

Badhanka kaalmeyso, haddii aadan aqoonsan erayga af finnishka ah.

Inkastoo aad isticmaalayso qaybta luqadda soomaaliga, mishiinka CV-ga ee Duunikoutsi wuxuu CV-gaada ku qorayaa af finnish. Marka aad Finland shaqo ka codsanayso, waa in CV-gu uu ku qornaadaa af finnish ama af ingriis.






# SIDAAN SOO SOCOTA AYAAD U ISTICMAALAYSAA DUUNIKOUTSI

Waxaad Duunikoutsi ku isticmaali kartaa borowsarka internetka (nettiselain) ee cinwaankiisu yahay **duunikoutsi.fi**

Hagahan waxaa loogu talaggalay in uu kaalmeeyo qaybta luqadda soomaaliga ee Duunikoutsi. Ka dooro ablikeeshinka luqaddaada soomaaliga.

## SAMEE LEYLISYADA

Waxaa wanaagsan in gebi ahaanba la barto tababarada ku jira ablikeeshinka, si aad macluumaad ballaaran uga hesho shaqo raadinta iyo nolosha shaqada ee Finland. Waxaad sidoo kale baran kartaa oo kaliya qaybta mowduuca adiga markaas kugu cusub. Tusaale ahaan, waxaa laguugu yeeray wareysi shaqo, u diyaargarow hawshaas adigoo baranaya marxaladda 5: Työhaastattelu.

Caqabadaha jiraa waa leylisyada Duunikoutsi, kuwaasoo adiga kugu imtixaanaaya in aad ka fekerto, tusaale ahaan, waxyaabaha aad ku fiican tahay iyo aqoontaada. Samaynta leylisyadaas waxaad ku heleysaa macluumaad, waxaadna ku baranaysaa aqoonta muhiimka ah. Waxaa kale oo aad Duunikoutsi ka heleysaa talooyin faa'iido leh oo kaa caawinaaya shaqo raadinta.

## ROBOKOUTSI AYAA KAA HAGAYA HORAY UGU SII SOCOSADA ABLIIKESHINKA

Chatbot-ka ablikeeshinka ee loo yaqaan, Robokoutsi ayaa kugu hagaaya isticmaalka ablikeeshinka wuxuuna sidoo kale kuu soo jeedinaayaa leylisyada iyo fiidiyowga. Robokoutsi waxaad ka heleysaa badhanka 'Chat' gadaashiisa.

Waxaa intaas dheer in aad Robokoutsi ka heleyso macluumaadka dheeraadka ah ee la xiriira mowduucyada nolosha shaqada.

## BOROFAYLKA AQOONTU WUXUU ISKU SOO URURINAYAA AQOONTAADA

Borofaylka aqoontu wuxuu meel isugu keenayaa aqoontaada, xirfaddaada iyo waxyaabaha aad xiisayso ee la xiriira dhammaan qaybaha nolosha: wakhtiga firaaqada, nolosha shaqada iyo waxbarashada. Macluumaadka qaar waxaa ay ka imaanayaan leylisyada aad samaysay. Macluumaad kale oo dheeraad ah ayaad ku dari kartaa borafaylkaada aqoonta.

Borofaylka aqoonta waxaa laga helaa liiska hoose halka ay ku qoran tahay 'Profiili'. Borafaylka aqoontu wuxuu fududaynayaa codsigaaga shaqada, sababtoo ah waxaa waxyaabaha muhiimka ah laga helayaa halkaas, iyagoo hal meel la isugu keenay. Borofaylka aqoonta ayaa sidoo kale kuu samaynaya CV diyaar ah oo aqoon ku salaysan.

## DHOWR MAR OO AAD GUJISO AYAAD KU HELEYSAA CV-GA

CV-ga aqoonta ku saabsan wuxuu beddel u yahay CV-gii soo jireenka ah, waana mid isticmaalkiisu uu ku soo badanaayo suuqyada shaqada ee dhallinyarrada dhexdooda. Waxaad Duunikoutsi ka soo degsan kartaa CV aqoon ku salaysan oo lacag la'aan ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan abuurista CV-ga waxaad ka heleysaa bogga 13 ee hagaha.

# IS AQOONSASHADA OO AH AQOONTA NOLOSHA SHAQADA EE MUSTAQBALKA



**Is aqoonsashadu waa aqoonsashada waxyaabaha aad ku fiicantahay, iyo garashada aqoonta, xirfadda iyo waxyaabaha aad qiimeyso.**

In aad is taqaan adigu waxay muhiim u tahay nolosha shaqada, is aqoonsashada wanaagsanna waxaa ay ku caawinaysaa marka aad shaqo codsanayso.

Baro sheegista meesha aad ku wanaagsantahay iyo waxyaabaha aad ku xooggan tahay. Waxaa laga yaabaa in billowga hore ay wax adag u ekaato, sidaas darteed ayay muhiim u tahay in arrinkaas tababar lagu qaato.

# AQOONSIGA XOOGAHA

Garashada awooddu muhiim ayay u tahay nolosha shaqada iyo shaqo raadinta. Aqoonsashada waxyaabaha aad ku fiican tahay waxay horumarinaysaa is aqoonsashadaada. Inta badan aad baan ugu qanacsannahay, waxaanan helnaa waxyaabaha nolosheenna qiimaha u leh, marka aan ka faa'iidaysanno waxyaabaha aan ku fiicannahay.

Bixinta iyo helitaanka aragti-celinta ayaa caawinaaya aqoonsashada waxyaabaha uu qofku ku fiican yahay, waana wax wanaagsan in taas lagu tababarto. Leylisyadan soo socda waxay kaa caawinayaan aqoonsashada waxyaabaha aad ku fiican tahay.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 1:
**Kuvaile itseäsi**

Haaste 2:
**Kehulaatikko**

Haaste 4:
**Vahvuuteni**

Marka aad doorato waxyaabaha aad ku fiicantahay, ka feker xaaladaha ay ka muuqdaan.

Miyaad leedahay awooddahaas tusaale ahaan, marka aad shaqo, dugsi ama hiwaayad ku jirto?



# QIIMAHA

Qiimuhu waa arrimaha aad u aragto in ay adiga muhiim kuu yihiin. Waxaa dhici karta in aad waxyaabaha aad qiimeyso ka fekerto marka aad ku jirto nolosha shaqada, sababtoo ah shirkaduhu waxay leeyihiin arrimo kala duwan oo ay qiimeeyaan.

Inta badan waxaad samaynta doorashada iyo go'aanka ku salaysaa qiimaha. Waxaa wanaagsan in aad ka fekerto qiimaha, si aad u hesho waddadii aad raaci lahayd.

Haddii aad doonayso in aad ka shaqayso shirkad aad wadaagtaan waxyaabaha aad qiimeyso, waa muhiim in aad marka hore aqoonsasto waxyaabaha aad qiimeyso.

Leylisyadan soo socda waxay kaa caawinayaan aqoonsashada waxyaabaha aad qiimeyso.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 14:
**Arvot**

Haaste 15:
**Mitä työ merkitsee sinulle?**

Internetka ka raadi shirkadda aad xiisaynayso.



Ma ka heshay bogga internetka ee shirkadda macluumaad ku saabsan waxyaabaha qiimaha leh?

# GARASHADA AQOONTAADA

Shaqo raadinta waa ay fududdahay marka aad garanayso waxa aad waxa aad taqaan, iyo weliba aqoonta aad leedahay. Waa in aad sheegi karto aqoontaada iyo xirfaddaada, marka aad qoreyso CV-ga iyo marka aad shaqada codsnaysaba.

Shaqada ka sokow, waxaad aqoonta iyo xirfadda ka heleysaa wakhtiga firaaqada, dugsiga, hiwaayadda iyo waxqabadka ikhtiyaariga ah.

Marmarka qaarkood, aqoonta iyo xirfadda la helo wakhtiga firaaqada ayaa ka muhiimsanaan karta waayo-aragnimada shaqada, sidaas darteed, ku xisaabtan kuwaas. Baro in aad u sheegto si dhiirannaan leh!

Leylisyadan soo socda waxaa ay kaa caawinaayaan barashada aqoonsashada aqoontaada iyo sheegisteeda.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 6:
**Osaaminen vapaa-ajalta**

Haaste 8:
**Harjoittele tunnistamista**

Haaste 9:
**Osaamisen esittely**

Haaste 10:
**Osaamiseni**

Haaste 11:
**IT- ja some-taidot**

Haaste 12:
**Kielitaito**






# U JIHEYSASHADA DHANKA NOLOSHA SHAQADA



**Codsashada shaqadu waa aqoon ay tahay in la barto. Si fiican ugu diyaargarow codsiga shaqada oo wakhti ku bixi.**

Shaqo codsashadu waa habsocod ka bilowda garashada waxyaabaha aad ku xooggan tahay iyo aqoosashada xirfaddaada, waxaana ay ku dhammaanaysaa billaabista shaqada cusub.

CV wanaagsan iyo codsi shaqo ayaa fure u ah goobtaada shaqada ee xigta, sidaas darteed waxaa wanaagsan in aad xoogga saarto.

## RAADI BOOS SHAQO

Shaqo codsashada waxaad ka bilowdaa ka fekeridda shirkada aad xiisaynayso iyo shaqooyinka aad rabi lahayd in aad samayso. La socoshada goobaha shaqooyinka ee bannaan waxaad ka heleysaa sawirka guud ee ku saabsan suuqa shaqada ee agagaarka degmadaada.

Goobaha shaqada ee bannaan waxaa laga helaa bogagga internetka ee kala duwan, iyo weliba bogagga shirkadaha u gaarka ah. Bogagga shaqaalaysiinta ka sokow, waxaa goobaha shaqada laga raadin karaa warbaahinta bulshada, wargaysyada ama shirkadda oo aad si toos ah ula xiriirto. Leylisyadan soo socda waxay kaa caawinaayaan barashada raadinta goobaha shaqada.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 3:
**Tee ammatin-valintatesti**

Haaste 18:
**Etsi työpaikkoja**

Haaste 20:
**Etsi paikkoja netistä**

Haaste 19:
**Tee lista työpaikoista**

Talo dheeraad ah! Inkastoo aadan si firfircooni ah u raadinayn shaqo, waxaa wanaagsan in goobaha shaqada marmar la fiirfiiryo. Waxaad sidan kula socon kartaa shaqaaleysiinta shirkadaha aad xiiseyso, waxaa laga yaabaa in aad ka hesho dhiirriggelin cusub, iyo in aad kula socoto shuruudaha goobaha aad xiiseynayso.

## SHABAKADA XIRIIR-WADAAGGA

Shabakadda xiriir-wadaagga waa arrin wakhtigan hadda la joogo muhiim u ah shaqo raadinta. Dadka aad taqaan ayaa si uun u noqonaaya shabakaddaada xiriir-wadaagga.

Marka aad shaqo codsanayso u sheeg shabakaddaada xiriir-wadaagga! Waxaa laga yaabaa in ay kuu sheegaan shaqooyin, kuwaas oo tusaale ahaan ka bannaan goobahooda shaqada, waxaadna iyaga ka ogaan kartaa goobaha shaqada ee aan ku jirin codsiyada guud.

Leylisyadan soo socda waxay kaa caawinaayaan barashada dheeraadka ah ee shabakaddaada xiriir-wadaagga. Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'.

Haaste #21
**Avaa LinkedIn-profiili**

Vinkki
**Kerro verkostollesi**



# CV-ga

CV-ga waa aqoontaada oo la soo koobay. Inta badan waxaad raacinaysaa marka aad direyso codsiga shaqada, ee aad shaqada raadinayso. Waxaad halkaas ku sheegeysaa waxa aad taaqaan iyo qofka aad tahay. Waxaa uu inta badan ka kooban yahay liiska shaqooyinkaadi iyo waxbarashadaadi hore.

Leylisyadan soo socda waxay kaa caawinaayaan barashada dheeraadka ah ee CV-ga, waxaadna ku samaysan kartaa CV-ga aqoonta ku salaysan, adigoo isticmaalaya mishiinka CV-ga ee Duunikoutsi.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 23:
**Mikä on CV?**

Haaste 24:
**CV-kuva**

Haaste 25:
**Tee CV**

Bogga soo socda waxaad ka heleysaa hagitaan dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalka mishiinka CV-ga.

Ka hor inta aadan shaqabixiyaha u dirin CV-gaada, samee leylisyadaan:

Haaste 26:
**Tarkista CV**

Haaste 27:
**Pyydä mielipidettä CV:stäsi**

# CODSIGGA SHAQADA

Codsiga shaqadu waa sawirka guud ee ku saabsan aqoontaada iyo rabitaankaada la xiriira shaqada aad codsanayso. Waxaad halkaas ku sheegeysaa sababta ay tahay in shaqadaas laguu qaato iyo sababta ay tahay in aqoontaada loo xiiseeyo. Ujeeddada codsiga shaqadu waa in la helo casumaadda waraysiga shaqada.

Codsiga shaqadu wxuuu noqon karaa dukumenti gaar ah ama foom dhanka internetka ah oo ku jira bogagga shaqabixiyaha. Waxaad codsiga raacisaa CV-gaada.

Bogga soo socda waxaad ku baranaysaa samaynta codsiga shaqo ee lagu guuleystay.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 28:
**Työhakemus**

Haaste 29:
**Vinkit työ-hakemuksen tekoon**

Haaste 31:
**Tartu puhelimeen**

Vinkki
**Tallenna työpaikka-ilmoitus**

# SIDAN AYAAD CV UGU SAMAYSAN KARTAA MISHIINKA CV-GA EE DUUNIKOUTSI

CV-ga aqoonta ku salaysan wuxuu beddel u yahay qof ka warranka soo jireenka ah, isticmaalkiisa codsiga shaqaduna wuu soo badanayaa. CV-ga aqoonta ku salaysan wuxuu xoogga saaraa waxyaabaha aad ku fiican tahay iyo xirfaddaada, waana sababta uu u yahay fursad fiican, marka aad heysato waayo-aragnimo shaqo oo yar. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa CV-ga aqoonta ku saabsan, xittaa haddii aad leedahay waayo-aragnimo shaqo.

Waxaad si lacag la'aan ah ablikeeshinka uga soo dejisan kartaa CV ku salaysan aqoon. Mishiinka CV-ga ee Duunikoutsi ayaa kuu samaynaaya CV muuqaal ahaan ah oo cad, si fududna loo akhrin karo. CV-ga waxaa lagu buuxiyay macluumaadkaaga, waxaana uu diyaar u yahay in shaqabixiyaha loo diro.

Haddii aad samaysay dhammaan leylisyada ku jira hagahan oo dhan, waxaad u gudubtaa hagitaanka hoos ku qoran. Haddii aadan weli waxba ka samayn leylisyada Duunikoutsi, samee ugu yaraan liiska leylisyada tababarka hoos lagu qoray ee `Olen hakemassa työpaikkaa'.

## SAMEEY UGU YARAAN LEYLISYADAN

| | |
|---|---|
| Haaste 1: | **Kuvaile itseäsi** |
| Haaste 2: | **Kehulaatikko** |
| Haaste 6: | **Osaaminen vapaa-ajalta** |
| Haaste 10: | **Osaamiseni** |
| Haaste 11: | **IT- ja some-taidot** |
| Haaste 12: | **Kielitaito** |
| Haaste 24: | **CV-kuva** |
| Haaste 26: | **Tarkista CV** |

1. Marka aad leylisyada samayso, guji badhanka liiska hoose ee "Profiili".
2. Aqoonsi kuu gaar ah samayso. Aqoonsiga waxaad ugu baahantahay gelitaanka Borafaylka aqoonta waxaadna ku isticmaali kartaa mishiinka CV-ga.
3. Qaar kamid ah borafaylka aqoontaada ee ku salaysan leylisyada aad samaysay waa diyaar. Buuxi meelaha ka dhimman borofaylka: sawirka, waxbarashada, waayo-aragnimada shaqada, aqoonta wakhtiga firaaqada, koorasyada iyo linkiyada. Haddii aadan koorasyo soo dhigan ama aadan lahayn waayo-aragnimo shaqo, waad bannayn kartaa goobahaas.
4. Marka aad buuxiso borofaylka aqoonta, guji badhanka "CV-kone".
5. Waad beddeli kartaa midabka CV-ga iyo waxaad CV-ga u soo dejisan kartaa qaab PDF ahaan ama waxaad isticmaali kartaa linki toos ah oo aad shaqabixiyaha u direyso.
6. Mishiinka CV-ga wuxuu hadda kuu sameeyay CV diyaar ah oo lagu qoray macluumaadkaaga. Waxaa ku qoran macluumaadka ku saabsan aqoontaada leylisyada aad samaysay iyo macluumaadka aad ku buuxisay borofaylka aqoontaada.
7. U dir CV-ga shaqo bixiyaha. Nasiib wanaagsan shaqo raadintaada darteed!

# WARAYSIGA SHAQADA

Ujeedada waraysiga shaqadu waa caddaynta in aad tahay qof ku habboon shaqada iyo bulshada shaqada.

Waraysiga shaqadu wuxuu sidoo kale adiga kuu yahay fursad aad ku ogaato, in goobta shaqadu tahay meel aad rabto in aad ku shaqayso iyo inkale.

Xusuusnow, in waraysiga shaqadu uu yahay fursad ay labada dhinac isku bartaan. Ma ahan waraysi hal dhinac ah.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 33:
**Treenaa haastatteluun**

Haaste 37:
**Kielletyt kysymykset**

Haaste 38:
**Sanaton viestintä**

Haaste 34:
**Helpota jännitystä**



Waraysiga shaqada waxaa loo qaadi karaa si fool-ka-fool ah, laakiin waayadan waxaa sidoo kale soo batay waraysiyada fiidiyowga iyo kuwa khadka telefoonka lagu qaado.

Haddii waraysiga loo qabanqaabinayo qaab fogaan ah, waxaad sidoo kale samayasaa leylisyadan:

Haaste 35:
**Video-haastattelu**

Haaste 36:
**Puhelin-haastattelu**

# SHAQADA DHEXDEEDA

Maalmaha hore ee shaqada waxaa kaa horimaanaaya arrimo badan oo ay tahay in aad xusuusato. Waxbaad ka baranaysaa shaqadaada cusub, waxaadna sidoo kale baranaysaa shaqaalaha.

Waxaa nolosha shaqada ku jira arrimo badan oo ay muhiim tahay in aad ogaato, sida kuwa la xiriira heshiiska shaqada iyo mushaarka.

Marka aad taqaan xeerarka nolosha shaqada, waxaad iska ilaalin kartaa dhibaatooyin badan, xuquuqdaadana waad ku dhegganaanaysaa!

Leylisyadan soo socda waxaad ku baranaysaa xeerarka shaqada, waxaad sidoo kale ku baranaysaa arrimaha la xiriira billaabista shaqada.

**Samee leylisyada tababarka ee 'Olen hakemassa työpaikkaa'**

Haaste 42:
**Ensimmäinen työpäivä**

Haaste 43:
**Työsopimus**

Haaste 44:
**Määräaikainen työsopimus**

Haaste 47:
**Perehdytys-vastuu**

Haaste 48:
**Vinkit työpaikalle**

Haaste 45:
**Työaika**

Haaste 49:
**Tarkista palkkasi**

Haaste 52:
**Työsuhteen päättyminen**



Vinkki
**Kesäduunari-info**

Vinkki
**Oikeudet ja velvollisuudet**

Vinkki
**Pyydä työtodistus**

# SI FIICAN AYAAD WAX U SAMAYSAY!

## Waxaad samaysay tababarka oo dhan.

Waxaan rajaynaynnaa in uu kaa caawiyay shaqo codsashada, iyo in aad ka baratay arrimo dheeraad ah oo la xiriira nolosha shaqada iyo shaqo codsashada.

Haddii aadan wali shaqo codsiga wax natijoo ah ka gaarin, ha niyadjabin! Waxaad hadda heysataa dhammaan agabka aad ugu baahan tahay shaqo codsiga.

Waxaad sidoo kale xusuusnaataa, inkastoo aadan markan helin goobtii shaqada ee aad codsatay, waxaa si kasta oo ay ahaataba aad baratay wax badan oo ku saabsan habsocodka codsiga shaqada, waxyaabahaas aad baratayna waxaad u isticmaali kartaa codsiyada shaqada ee dambe.




Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ablikeeshinka Duunikoutsi waxaad ka heleysaa cinwaanka:

nuortennyt.fi/palvelu/duunikoutsi/

Aragticelinta arrinkaan la xiriita waxaad ablikeeshinka dhexdiisa ugu samayn kartaa luqadaha kala ah af finnish, af iswiidhish ama af ingiriis, adigoo isticmaalaya cinwaanka:

survey.zef.fi/5g8thrkz/

nyt TURKU Euroopan unioni Euroopan sosiaalirahasto Vipuvoimaa EU:lta 2014–2020